

IIB MA GALO

**AAFINTA**



**RASMIGA AH**

**الرسمية**

**الجريدة**

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Muqdisho,

2 MAAJO 1977

L. 5

Laanta Faafin Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada J.D.S.

**BIL SOO BAX**

جريدة شهرية

IMADU: waa 5 shilin lambar waliba —

waa Sh. 100 Somaliya

Shs.

2 la

— Lacagta

uraha

**K O O B N I I N**

**BOGGA KOOWAAD**

**S H A R C I**

SHARCI L. 34/Bis ee 1 Abriile 1977, *Sharciga Farsamo-Yaqaannada.*

Bogga 425

**BOGGA LABAAD**

**X E E R**

W. M

**BOGGA SADDEXAAD**

M

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 34/Bis ee 1 Abriile 1977 Sharciga Farsamayaqaannada.

MADAXWEYNAHA

J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida Laad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar. 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. 17, 18 iyo 19 ee Idii Luulyo, 1976;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 29 ee 1 Abriile 1970 iyo Sharciga lam. 36 ee 22 Abriile 1972 iyo beddelaadoodii ka dambaysay kuna saabsanaayeen Shaqaalaha Dawladda iyo Wakaaladaha Madax-Banaan;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aanka Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka Iaad

(Macneynta Erayada Sharcigan)

Marka sharcigan laga hadlayo, ereyada hoos ku qoran waxaa loo fasirayaa sida eray kasta hortiiisa ku qoran:

1. Shaqo (Occupation) — waa hawl qafka awood u siin karta inuu barto kana shaqeeyo gacanta ama Maskaxda;
2. Farsamo (Trade-craft) — waa hawl xirfadeed, una baahan in shahaado ama aqoonsi lagu kasbo, loona yeesho waayo-aragnimo, dhinaca xirfadda gacanta iyo tiyooriyadda la xiriirta;
3. Farsamobarad (Apprentice) — waa qof ku jira tababar si loo gaarsiiyo heer kaaliye xirfadle, ama xirfadle aan ka mid ahayn Hay'adaha Dawladda.
4. Kaaliye Xirfadle — waa qofka Shaqaalaha Caadiga ahna ka xeel dheer, waayo-aragnimada iyo aqoontisuna gaarsiisneyn heer Xirfadle.
5. Xirfadle (3aad) — waa qofka waayo aragnimo, amaba laylis ku kasbay xirfad gacmeed, kana gudbay imtixaanka qiimeynta ee Heerka Saddexaad.
6. Xirfadle Dhexe (2aad) — waa qofka awood u leh cillad helid iyo bixin, iyo beddelid xubin qalab farsamo, gudbeyna istixaanka qiimeynta xirfadda ee Xeerka Labaad.

7. Xirfadle sare (Iaad) — waa qofka awood u leh cillad helid iyo bixin, garan karana sababtii cillad keentay kuna darsaday Teoriyaddii loo baahnaa, gudbeyna imtixaanka qiimeynta xirfadda Heerka koowaad.
8. Farsamayaqaan (3aad) — waa qofka haysta shahaadada Dugsiga Sare ee Farsamada, ama shahaado u dhiganta.
9. Farsamayaqaan dhexe 2(aad) — waa qofka dhammeeyey Dugsiga Sare ee Farsamada, qaatay ugu yaraan sannad Tababar farsamo oo la xiriirta Cilmiga shaqadiisa. kuna shaqeeyey Farsamadaas ugu yaraan laba sanno.
10. Farsamayaqaan Sare (Iaad) — waa qofka, isagoo ka haysta shahaadada Dugsiga Sare ee Farsamada, qaatay ugu yaraan laba sano oo tababar farsamo la aqoon sanyahay kuna shaqeeyey Farsamadaas ugu yaraan laba sano.
11. Aqoonyahan (Jaamici Professional) — waa qofka haysta shahaado Jaamici ah ee farsamo.
12. Sharciga Farsamo-yaqaannada Waxaa loola jeedaa sharcigaan ee lagu maamulayo farsamabaradka, kaaliye xirfadle, xirfadle, Farsamayaqaannada iyo Aqoonyahannada.
13. Hay'adaha Dawladda — waxaa loola jeedaa Wasaaradaha Warshadaha, Wakaaladaha, Dawladaha Hoose, Bankiyada, Shirkaalaha iyo Mashaariicda ay Dawladdu leedahay ama qayb ku leedahay.

Qodobka 2aad

(Maamulka Farsamayaqaannada)

Marka laga billaabo Ida Maajo 1977 shaqaalaha Farsamayaqaanka ah waxaa loo dejiyey sharcigan u gaarka ah oo lagu maamulo daraajooyinkooda, Jagooyinkooda iyo Mushaarkoodaba, sida ku cad lifaaqa Iaad ee Sharcigan.

Qodobka 3aad

(Daraajooyinka Farsayaqaannada)

1. Daraajooyinka Farsamayaqaannada waxay u kala qabsan yihiin sida soo socota:
  - b. Aqoonyahan
  - t. Farsamayaqaan
  - j. Xirfadle
  - x. Kaaliye Xirfadle

Kkh.

2. Jago kasta waxay leedahay darajooyin kala duwan, musha-haaro bilow ah iyo mid Sare ee ay ku dhammaato.
3. Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha Farsamayaqaannada, ayadoo loo tixgelinaayo heerka imtixaanka uu gudbay ama sha-haadada Farsamada ee uu sito, ayaa lagu meeleyn doonaa da-rajada ku habboon ee ku xusan Lifaaqa laad ee Shareigan.

Qodobka 4aad

(Dallacaad)

1. Farsamo-yaqaannadu waxay xaq u leeyihiin dallacaad darajo.
2. Dallacaadda Darajada waxaa keliye lagu mutaysan karaa im-tixaan oo qofku ku guuleysta ama marka uu la yimaado sha-haado ka sareysa tii hore oo siday (cambiamento di categoria).
3. Qofkii muujiya karti, daacadnimo, hawlkarnimo dheeraad ah, qayb weyna si muuqata uga qaata horumarka Dalka, wa-xaa la siin karaa dallacaad gaar ah (special merit).
4. Qofka farsamayaqaanka ah darajada uu joogo lagama dallac-siin karo haddii aanu la imaan shuruudaha ku cad lifaaqa labaad ee shareigan.

Qodobka 5aad

(Imtixaan)

1. Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha farsamayaqaanka ah la-badii sanaba marbaa imtixaan laga qaadi karaa si loo qaymee-yo heerka aqoontiisa.

Qodobka 6aad

(Heerka aqoonta xirfadlaha)

1. Qofka xirfadlaha ee doonaya inuu u gudbo farsamayaqaan, waa inuu farsamada uu u go'doomay u yaqaana anteori ahaan iyo Baraatika ahaan, isticmaali karaana kutubta iyo naqaa-shadaha Farsamadaas la xiriirta.
2. Xirfadlaha waa inuu ugu yaraan laba sano ku shaqeeyaa da-rajada koo'waad ee xirfadlaha, imtixaanka farsamadana ku guuleystaa, inta uusan u gudbin darajada ka sareysa midda uu joogo.
3. Xirfadlaha koo'waad (ama sare) ee u dallaca Farsamayaqaan, lacagtii uu ku qaadan jiray darajada xirfadlaha waxba ka go'yi maayaan, hase yeeshee jago ahaan wuxuu galayaa heerka far-samada ee uu imtixaankeeda ku guuleystay.

4. Xirfadlaha darajada koo'waad jooga, ee aqoon iyo waayo aragnimo dheer leh, ee laba jeer laga soo qoray warbixin wanaagsan, kana gudbi waayey imtixaankii uu farsamaya-qaanka ugu gudbi lahaa, hawshana aan looga maarmin, wa-xaa heerka mushaharkiisa la gaarsiin karaa heerka ugu sar-reeya ee xirfadlaha.

Qodobka 7aad

(Farsamayaqaan sare ee u gudbaya aqoonyahan)

1. Farsamayaqaanka sare ee u gudbaya aqoonyahan, lacagtii uu ku qaadan jirey jagada Farsamayqaannimada waxba ka go'imaayaan hase yeeshee, jago ahaan wuxuu gelayaa jagada ugu hooseysa ee Aqoonyahanka.
2. Farsamayaqaanka Sare ee aqoon iyo waayo aragnimo dheer leh, ee laba jeer laga soo qoray warbixin wanaagsan, kana gudbi waayey imtixaankii uu ugu gudbi lahaa aqoon-yahan hawshana aan looga maarmin, waxaa mushaharkiisa la gaarsiin karaa heerka ugu sarreeya ee farsamayaqaanka.

Qodobka 8aad

(Aqoonyahannada)

Aqoonyahannada Jaamiciga ah mushaharkooda bilowga ah waxaa loo kala sarreynsiinayaa hadba sida shahaadadooda u kala sar-reyso iyo aqoontooda waayo aragnimada ah.

Qodobka 9aad

(Shahaadada Dugsiga Dhexe)

Qofka isagoo haysta shahaadada Dugsiga Dhexe qaatay tababar gaar ah ee Farsamo ugu yaraan labo sano. wuxuu la mid ya-hay Farsamayaqaanka (F. B)

Qodobka 10aad

(Shahaadada Dugsiga Sare ee Caadiga ah)

Qofka isagoo haysta shahaadada Dugsiga sare ee Caadiga ah, qaatay tababar gaar ah ee farsamo yaqaan hal sano. ama ka gudbay imtixaanka farsamo wuxuu noqonayaa farsamoyaqaan (F 3).

### Qodobka 11aad

(Qoritaanka Farsamabarad)

2. Qoritaanka Farsamabaradka (apprentisti) waxaa loo raacayaa habka shaqo qoridda ee lagu tilmaamay sharciga lam. 48 ee 25 Disember, 1974, iyo Beddelaaddii ka dambeysay.
3. Haddii ay Miisaaniyaddu ogoshahay Hay'adaha Dawladda waxaa lagu amri karaa in ay qoraan shaqaale Farsamabarad ah si loo kordhiyo tirada iyo aqoonta Farsamayaqaannada Dalka u baahan yahay.
4. Qofka farsamo baradka ah wuxuu xagga badbaadada shaqaalaha kala mid yahay qofka uu xirfadda ka baranaayo

### Qodobka 12aad

(Guddiga Qaranka ee Farsamada)

1. Si sharcigaan si habsami ah loo hirgeliyo waxaa la dhisay Guddiga Qaranka ee Farsamada ee ka kooban Hay'adaha soo socda:
  - b. Wasaaradda Gaashaandhigga
  - t. Wasaaradda Shaqada iyo Bulshada
  - j. Wasaaradda Warshadaha
  - x. Wasaaradda Gaadiidka
  - kh. Wasaaradda Waxbarashada
  - d. Wasaaradda Hawlaha Guud
  - r. Wasaaradda Kalluumka
2. Xoghaynta Guddiga Qaranka ee Farsamada waxay noqon doontaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

### Qodobka 13aad

(Xilka Guddiga Qaranka ee Farsamada)

1. Xilka iyo hawsha Guddiga Qaranka ee Farsamada waxay tahay:
  - b. Inuu dejiyo Qorshaha Imtixaanka Farsamo-yaqaannada,
  - t. Inuu ka qaado shaqaalaha Farsamo-yaqaannada imtixaan-qiimeeyana aqoonta qof kasta ee Farsamo-yaqaan ah;
  - j. Inuu bixiyo shahaado Farsamo-yaqaan;

- x. Inuu dejiyo barnaamijka tababarrada shaqaalaha Farsamo-yaqaannada ayadoo lala kaashanaayo Hirgelinta tababarradaas Hay'adaha ku shaqo leh.

2. Guddiga Qaranka waxay awood u leehiyiin in ay magacaabaan Guddiyo Hoose ee ka kooban dad Farsamo-yaqaan ah; si ay imtixaan uga qaadaan dadka Farsamayaqaanka ah ee sharcigani tilmaamay.

### Qodobka 14aad

(Isu dhignaanta darajooyinka)

1. Darajooyinka Farsamo-yaqaannada ee ku xusan Qodobka 3 ee sharcigan waxaa loo isticmaalayaa habka hawl-gabka iyo liitirka sida soo socota:

- Darajada (X) — waxay u dhigantahay darajada «C»
- Darajada (F) — waxay u dhigantahay darajada «B»
- Darajada (A) — waxay u dhigantahay Darajada «A»

### Qodobka 15aad

(Dhaqan gelinta Sharcigan)

1. Dhammaan Hay'adaha Dawladda, marka sharcigani dhaqan galo, muddo 90 maalmood gudahooda, waa in ay magacyada farsamo-yaqaannada u gudbiyaan Wasaaradda Shaqada iyo Bulshada ayagoo tilmaan ka bixinaya xirfada ama farsamada ee qof waliba hayo.
2. Qaabka gelinta cusub ee Farsamo-yaqaannada waa in ay ku dhammaato muddo aan ka badnayn lix bilood gudaheed marka laga billaabo taariikhda uu dhaqan galo sharcigan.
3. Shaqaalaha Farsamo-yaqaannada ah waxay u hoggaansamaayan sharcigan iyo sharciyada shaqaalaha Hay'adaha dawladda xagga Qoritaanka, asluubta hawsha, dallacaadda edbinta ka saaridda shaqada iyo iwm. ee la xiriirta maamulka Guud ee aan lagu xusin sharcigan.

Qodobka 16aad

(Liiska Farsamayaqaannada)

1. Magaayada iyo tirada Farsamayaqaannada ee illaa iyo hadda la aqoon sanyahay waa kuwa ku xusan lifaaqa labaad ee sharcigan.
2. Haddij ay soo baxaan Farsamoyin aan ku xusnayn lifaaqa Labaad ee Sharcigan markii Guddiga Qaranku ka hubsado jiritaanka farsamayaqaankaas waxaa lagu kordhin karaa liiska Farsamayaqaannada ee sharcigan ku lifaaqan.

Qodobka 17aad

(Xeeri Nidaamiye)

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, markii uu dhegeysto talada Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Bulshada, wuxuu soo saari doonaa Xeeri-Nidaamiye lagu fasirayo sharcigan wixii aan ku eaddeyn.

Qodobka 18aad

(Burin Sharci ama Xeeri)

1. Waxaa la buriyey sharci ama xeeri kasta ee ka soo horjeeda Sharcigan ama aan lasoon karin.
2. Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka laga billaabo Ida Maajo, 1977.
3. Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 1.4.1977

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya  
(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

SHAXDA JAGADA DARAJADA IYO MUSHAHARADA

SHAQAALAHA JOOGTADA AH EE FARSAMAYAQAANKA

Jago	Dadarada	Darajada	Darajada	Darajada
	4aad	3aad	2aad	1aad
	S. S0.	Sh. S0.	Sh. S0.	Sh. S0.
Aqoonyahan (A)		800	1000	1200-1800
Farsamayaqaan (F)		600	800	1000-1400
Kirfadle (X)		450	600	800-1200
K-Xirfadle (KX)	350	—	—	—
Farsamobarad	—	—	—	—

Farsamobaradku wuxuu qaadanayaa lacag Gunno ah oo dhan Sh. S0. 120 bishiiiba.

LIFAAQA 2aad

HABKA FARSAMAYAQAANNADU UGU GUDBAYAAN  
FARSAMO-YAQAAN DHEXE IYO KAN SARE

Lambar Darajo	Tababar	Shaqo	wuxuu	Shaqo	wuxuu
			noqonayaa		qonayaa
1. Farsamo-yaqaan	1Sano	2Sano	F. Dhexe	4Sano	F. Sare
2. Farsamo-yaqaan	2Sano	1Sano	F. Dhaxe	3Sano	F. Sare
3. Farsamo-yaqaan	3Sano	—	F. Dhexe	3Sano	F. Sare

(ama ka badan)

## LIFAAQ

Halkan waxa ku taxan farsamooyinka ilaa hadda loo aqoonsanaaday inay xeerka sharciga farsamooyinka waafaqsan yihiin.

### 1. FISIKAL SAYNNISYAHANADDA PHISICAL SCIENTISTS.

1. Kimikiiste  
Chemists
2. Fisiikiiste  
Physicists
3. Farsamoyaqaanka Cilmiga Fisikada  
Physical Science Technician

### 2. HINDISEYAQAAN DHISMO, INJINEERO IYO FARSAMOYA- QAANADA LA XIDHIIDHA HAWLAHA. ARCHITECTS, ENGINEERS AND RELATED TECHNICIANS.

4. Hindise yaqaan iyo Magaalo dejiye  
Architects and town planners
5. Injineer Dhismo  
Civil Engineers
6. Injineer Koronto iyo Elektroonik  
Electrical and electronics Engineers
7. Injineer Makaaniko  
Mechanical Engineers
8. Injineer Kimiko  
Chemical Engineers
9. Injineer Macdanta Birta  
Metallurgists
10. Injineer Macdan qode  
Mining Engineer
11. Injineer Wershado-yaqaan (Wershayn)  
Industrial Engineers
12. Dhulsimayaal  
Surveyers
13. Nakhshad Sameeye iyo Guuriye  
Draughtmen
14. Farsamo yaqaan Injineernimada Dhismaha  
Civil Engineering technician
15. Farsamoyaqaan Koronto iyo Elektroonikada  
Electrical and Electronics technician
16. Farsamoyaqaan Injineeranimada Makaanikada  
Mechanical Engineering technicians
17. Farsamoyaqaan Injineeranimada Kimikada  
Chemical Engineering technician
18. Farsamoyaqaan Macdanta Birta

19. Metallurgical technician  
Farsamoyaqaan qoddida Macdanta  
Mining technician

3. *MADAXDA DAYUURADAH A IYO MARAAKIIBTA.  
AIRCRAFT AND SHIPS' OFFICERS.*

20. Duuliyayaasha Dayuuradaha, Hogaamiyayaasha  
Maraakiibta iyo Injineernimada Duuliska  
Aircraft Pilots, Navigation and flight Engineers  
21. Madaxda Hagayaasha Maraakiibta iyo Dayuuradaha  
Ships, deck Officers and Pilots  
22. Injineer Markab  
Ships' Engineers

4. *SAYNTIISYADA NAFLAYDA IYO FARSAMOYAQAANADOO.  
DA*

*LIFE SCIENTISTS AND THEIR TECHNICIANS*

23. Sayntiisyada Dadka, dhirta iyo xoolaha  
Biologists and Zooloogists  
24. Cayayaanka iyo farmakoologist  
Bacteriologists and Pharmacologists  
25. Agronomists  
Agronomists  
26. Farsamoyaqaanada Sayniska Naflayda  
Life Scientists Technicians

5. *TAKHAATIIRTA DAAWADA, ILKAHA IYO XOOLAHA  
MEDICAL, DENTAL AND VETERINARY*

27. Takhaatiirta Daawada  
Medical Doctors  
28. Takhaatiirta Ilkaha  
Dentists  
29. Kaaliye Takhtar  
Medical Assistant  
30. Kaaliye Takhtar Ilkood  
Dentist Assistant  
31. Takhaatiirta Xoolaha  
Veterinarians  
32. Kaaliye Takhtar Xoolo  
Veterinary Assistant  
33. Daawo Diyaariye  
Pharmacists  
34. Kaaliye Daawo diyaariye  
Pharmaceutical Assistant

35. Cunto yaqaan iyo Nafaqoyaaqanka Caafimaadka Guud  
Dietitians and public health nutritionists  
36. Kalkaaliye Aqoonyahan  
Professional Nurses  
37. Kalkaaliyayaal farsamoyaqaan  
Nursing Personal  
38. Ummuliso Aqoonyahan  
Professional midwives  
39. Ummuliso Farsamoyaqaan  
Midwifery Personnel  
40. Farsamoyaanka Indhaha iyo diyaarinta Muraayada In  
dhaha  
Optometrists and opticians  
41. Fisiterabis iyo tirbiste  
Physiotherapists and Occupational therapists  
42. Farsamoyaqaan Raajo  
Medical X-Ray technicians

6. *XARDHAYAAL IYO SAWIRLAYAAL  
SCULPTURES, PAINTERS PHOTOGRAPHERS AND CREATI-  
VE ARTISTS*

43. Xardhayaal  
Sculptures, artists and painters  
44. Filim qaadayaal iyo Sawirlayaal  
Photographers and Cameramen

7. *BEERALEYDA, XOOLODHAQATADA, SEERALEYDA KALLU-  
UMAYSATADA IYO UGAADHSATADA  
AGRICULTURAL, ANIMAL HUSBANDRY, FORESTRY, FISHE-  
RMEN AND HUNTERS.*

45. Beeridda Badarka iyo Khudagarta  
Field crops and vegetable farmers  
46. Beeridda Midhaha kala gedisan  
Orchard, Vineyard, tree and shrub crops  
47. Farsamoyaqaanka dhaqidda Xoolaha  
Livestock technicians  
48. Farsamoyaqaanka Caanaha Xoolaha  
Dairy farmers  
49. Talaalka Beeraha  
Nursery farmers and gardeners  
50. Ku shaqaynta Makiinadaha Beeraha  
Farm Machinery Operator  
51. Dhaqaalaynta iyo Abuuridda Dhirta  
Loggers

- 52. Kalluumaysiga  
Fishermen
- 53. Dhaqidda Digaaga  
Poultry farmers

8.0. *WAX SOO SAARKA IYO KU SHAQAYNTA MAKIINADAHA TACAB SOO SAARKA.*

*PRODUCTION AND TRANSPORT EQUIPMENT OPERATOR.*

- 54. Qoddida Ceelasha iyo Macdanta  
Miners and well drillers
- 55. Farsamoyaqaanka Macdanta iyo dhagaxa  
Mineral and stone treaters.

8.1. *SOOSAARIDDA BIRTA*

*METAL PROCESSERS*

- 56. Dhalaalinta birta, beddelka iyo ku safaynta moofada  
Metal smelting, converting and refining furnacemen
- 57. Ka samaynta birta dhalaalisan qalab  
Metal rolling mill
- 58. Ku dhalaalinta birta moofada  
Metal melters and heaters
- 59. Samaynta Birta  
Metal casters
- 60. Adkaynta Birta  
Metal Annealers, temperers and case hardenerrs
- 61. Ka samaynta birta tuubooyinka iyo xadhkaha korontada  
Metal drawers and Extruders
- 62. Macdanaynta Qalabka birta & Dabaadhidda  
Metal platers and coaters

8.2. *DIYAARINTA QORYAHA IYO SAMEYNTA WARQADAHA*

*WOOD PREPARATION AND PAPER MAKERS*

- 63. Farsamada diyaarinta Qoriga  
Metal treaters
- 64. Miishaaraynta qoriga iyo soo Saaridda Qoriga  
Sawyers, plywood makers and wood processing
- 65. Xalluufinta Qoriga  
Paper pulp preparers
- 66. Samaynta Warqadaha  
Paper makers

8.3. *KU SHAQAYNTA KIMIKADA*

*CHIMICALPROCESSERS*

- 67. Daqijjinta, buddeynta iyo Qaldada Kimikada  
Chemical Crushers, grinders and mixers.
- 68. Karinta, Uuminta iyo dab yaqaanka  
Cookers, roasters and heat treaters
- 69. Shaadheynta iyo kala soocid-yaqaanka  
Filter and separator operators
- 70. Safaynta Batroolka  
Petroleum Refinery.

8.4 *FARSAMOYAQAANKA MIIQIDA, FALKINTA IYO KA SHAQAYNTA DHARKA.*

*SPINNERS, WEAVERS, KNITTERS AND DYERS.*

- 71. Diyaarinta dunta iyo suufka  
Fibre preparers
- 72. Miiqida iyo duubidda dunta  
Spinners and weavers
- 73. Falkinta, Isugeynta iyo diyaarinta kaadhka Nakhshadaha  
Weaving and knitting-machine setters and pattern card preparers.
- 74. Falkinta  
Weavers
- 75. Tolidda  
Knitters
- 76. Sibaaqaynta, Midabaynta iyo dhammaystirka Dharka  
Bleachers, dyers and textile product finishers

8.5. *HOODHINTA, MAGDINTA IYO KALA SOOCIDDA SAANTA IYO DHOGORTA*

*TANNERS AND FELLMONGERS AND PELT DRESSERS*

- 77. Hoodhinta iyo Magdinta  
Tanners and fallmongers
- 78. Hoodhida dhogorta  
Pelt dressers

8.6. *MAKIINADAHA SAMAYNTA CUNTADA IYO CABIDDA*

*FOOD AND BEVERAGES PROCESSERS*

- 79. Shiididda Badarka  
Grain millers



80. Shiididda iyo Safaynta Sonkorta  
Sugar processors and refiners
81. Hiliblayaasha  
Butchers and Meat Preparers
82. Kaydinta Cuntada iyo Cabidda  
Food Preservers
83. Kala Miiridda Caanaha, Burcadka iyo Farmaajada  
Dairy product processors
84. Samaynta Burka iyo Nacnaca  
Bakers, Pastrycooks and confectionary
85. Samaynta Khamriga iyo Alkoolka  
Brewers, wine and Beverage makers

8.7. *DIYAARINTA BUURIGA IYO SOO SAARIDIISA*  
*TOBACO PREPARERS AND PRODUCT MAKERS*

86. Diyaarinta Buuriga  
Tobacco preparers
87. Samaynta Sigaarka  
Cigarette Makers

8.8. *DAWAARLAYAASHA, DHARTOLAYAASHA, MAKIINADYA-*  
*QAAN IYO TOLIDDA DHARKA ADAG*  
*TAILORS, DRESS MAKERS, SEWERS AND UPHOLSTERS*

88. Dawaarlayaasha iyo dhar Tolayaasha  
Tailors and dress makers
89. Dawaarlayaasha dharka suufka ah  
Fur Tailors
90. Tolidda Koofiyadaha Ragga iyo Haweenka  
Milliners and hatmakers
91. Gogoynta, Nakhshadaynta dharka  
Pattern makers and cutters
92. Tolmo yaqaan iyo daabac Sameeye  
Sewers and embroiders
93. Tolidda dharka Adag  
Upholsters

8.9. *KABATOLAYAASHA IYO SAMAYNTA SAAMAHA*  
*SHOEMAKERS AND LEATHERS GOODS*

94. Kabatolayaasha iyo kabo-hagaajiyayaasha  
Shoemakers and shoe-repairers
95. Gogoynta kabaha, Cabirayaasha iyo gacan ku tolidda  
Shoe cutters, lesters and sewers
96. Tolidda Qalabka Saamaha laga sameeyo  
Leather goods makers

8.10. *SAMENTA ALAABTA GURYAHA IYO FARSAMADA QORIGA*  
*CABINED MAKERS AND WOOD WORKERS*

97. Samaynta alaabta Guryaha (Loox)  
Cabinet makers
98. Ku shaqaynta Makiinada Qoriga  
Wood Working Machine Operators.

8.11. *GOGOYNTA DHAGAXA IYO XARDHINTA*  
*STONE CUTTERS AND CARVERS*

99. Gogoynta Dhagaxa iyo Xardhinta  
Stone Cutters and Carvers.

8.12. *BIRTUMIDDA, QALAB SAMAYNTA IYO KU SHAQAYNTA*  
*MAKIINADDA QALABKA.*

*BLACKSMITH, TOOLMAKERS AND MACHINE TOOL OPERATORS*

100. Birtumidda, Dubbaynta iyo Moofaynta Birta  
Blacksmith, hammersmiths and forging press operators.
101. Qalab Samaynta, Nakhshad samaynta birta iyo bir samaynta  
Toolmakers, metal pattern makers and metal makres.
102. Ku shaqaynta Makiinadda Qalabka samaysa ee Iswadda  
Machine Tool setter Operators.
103. Ku shaqaynta Makiinadda Qalab Samaynta  
Machine Tool Operator
104. Xoqidida, Xaydhaynta iyo Afaynta Qalabka wax gooya  
Metal, Grinder, polishers and tool sharpeners

8.13. *SAMAYNTA QALABKA CABIRKA, ISUGEYNTA XUBNAHA*  
*MAKIINADAHA IYO MAKIINAD SAMAYNTA*

*MACHINERY FITTERS, MACHINE ASSEMBLERS AND PRECISION INSTRUMENT MAKERS.*

105. Makiinad Samaynta, Isugaynta iyo toornaha  
Machinery, fitters and machine assemblers
106. Samaynta Saacadaha (Waaweyn yar-yar) iyo QALABKA  
Cabbirka  
Watch, Clock and precision Instruments makers
107. Samaynta Baabuurta  
Motor Vehicle mechanics
108. Samaynta Makiinada Dayuuradaha  
Aircraft engine mechanics.

8.14. SAMAYNTA MAKIINADAHA KORONTADA IYO ELEKTARONIKADA

ELECTRICAL FITTERS AND ELECTRONICS

- 109. Samaynta Korontada  
Electrical Fitters
- 110. Samaynta Elektaroonikada  
Electronics Fitters
- 111. Isugeynta Xubnaha Korontada iyo Electaroonikada  
Electrical and Electronic equipment ASSEMBLERS
- 112. Hagaajinta Raadiyaha iyo Raadiyaha la iska arko  
Radio and televisions repairmen.
- 113. Geliyayaasha Telefoonada iyo Telegraafyada  
Telephone and telegraph Installers
- 114. Dhigidda Xadhkaha Korontada iyo isku xidhka  
Electrical linesmen and cable joiners.

8.15. IDAACADDA IYO QALABKA CODKA DHEEREEYA

BROADCASTING STATION AND SOUND EQUIPMENT, OPERATORS AND CINEMA PROJECTIONISTS

- 115. Farsamoyaqaanka Idaacada  
Broadcasting station Operator
- 116. Farsamoyaqaanka Qalabka Dhawaaqa iyo Filim Wada-yaasha.  
Sound equipment Operators and Cinema Projectionists

8.16. TUUBIISTE, ALXANLE, SAFEEXADYAQAAN, BIR-DHISMO.

PLUMBERS, WELDERS, SHEET METAL AND STRUCTURAL METAL PREPARERS AND ERECTERS.

- 117. Tuubiiste iyo Dhuunyaqaan  
Plumbers and Pipe Fitters
- 118. Alxanle iyo Olol ku jare  
Welders and Flame-cutters
- 119. Safeexadyaqaan  
Sheet Metal Workers
- 120. Bir Dhismo Diyaariye iyo dhise  
Structural Metal Preparers and Metal Erectors

8.17. DAHABLE IYO MACDAN KA SHAQEEYE  
JEWELLERY AND PRECIOUS METAL WORKERS

- 121. Dahable, Qalin iyo Macdan Tume  
Jewellery and Precious metal workers

8.18. QURAAARAD SAMAYNTA

GLASS FORMERS AND POTTERS.

- 122. Quraarad Sameeye, gooye, xaquuqa iyo dhammaystine  
Glass formers, cutters, Grinders and finishers
- 123. Samaynta Dhoobada iyo Qalab xaquuqa  
Potters clay and abraisive formers
- 124. Moofaynta Quraaradda iyo Seeraamikada  
Glass and Ceramics Kilnmen.
- 125. Xardhidda Quruuradda  
Glass engravers and etchers
- 126. Rijiyeynta iyo Nakhshadaynta Quruuradaha  
Glass and Ceramics painters and decorators

8.19. SAMAYNTA CIJIRKA IYO CAAGA

RUBBER AND PLASTICS PRODUCT MAKERS

- 127. Samaynta Cinjirka iyo Caaga  
Rubber and plastics Product makers
- 128. Samaynta Lugaha Cinjirka iyo Caaga  
Tire makers and Vulcanisers.

8.20. SAMAYNTA WARQADAHA IYO KARTOONADDA

PAPER AND PAPERBOARD PRODUCT MAKERS

- 129. Samaynta Sanduuqa Waraaqaha iyo kartoona  
Paper and paperboard makers

8.21. DAABACAADA

PRINTERS

- 130. Diyaarinta Xaruufta Daabacaada (Gacanta iyo Makii-nadda)  
Compositors and typesetters
- 131. Ku shaqaynta Makiinadaha Daabaca Xaashiyaha safeexadaha, iyo kuwa la xidhiidha  
Printing Pressmen.
- 132. Samaynta Safeexadaha Daabaca  
Stereotypers and electrotypers
- 133. Xaradhaynta Sawirka  
Photo engravers
- 134. Xardhinta Qalabka Daabaca  
Printing engravers
- 135. Samaynta Jeldiyadda Buugaga, Wargeesyada iyo Daabacidda Xuruufta Waaweyn.  
Bookbinders
- 136. Daabaca Midabyadda, Filimada iyo Sawirka  
Photographic darkroom workers

8.22. RIJIYE

PAINTERS.

137. Rinjiye dhismaha  
Painters, construction

8.23. WAX SOO SAARKA

PRODUCTION.

138. Samaynta iyo Hagaajinta Qalabka Muusikada  
Musical Instrument makers and tuners
139. Tolidda Kolayadda iyo Xaaqimada  
Basketry weavers and brush makers
140. Samaynta Shubka waxyaalaha kala geddisan.  
Non-metallic mineral product makers

8.24. FUUNDIGA, NIJAARKA IYO DHISMAHA

BRICKLAYERS, CARPENTERS AND CONSTRUCTION WORKERS.

141. Leben-dhigaha, Dhagax dhisaha iyo marmar-dhigaha  
Bricklayers, Stone-masons and tile setters
142. Diyaarinta Shubka, dhammaystirka Shamiitada  
Reinforced Concreters, Cement finishers and Terrazzo workers.
143. Safq Sameeye  
Roofers
144. Nijaarnimo iyo qoryo isku hagaajiye  
Carpenters, joiners and parquetry workers
145. Gidaar Salaaxe  
Plasterers
146. Gelinta Gidaarka Qalabka, Dhuumaha iyo Qaboojiyaha  
Insulators
147. Qurruuradaynta Albaabada iyo Daaqadaha  
Glaziers
148. Dhismaha  
Construction Workers

8.25. MAKIINADAHA ABUURIDDA KORONTADA, BIYO KARIYAHA IYO TALAAJADAHA.

STATIONERY ENGINE AND EQUIPMENT OPERATORS.

149. Makjiinadaha Qaybinta Xoogga Korontada, neefta iyo  
Biyaha.  
Power generating Machinery operators
150. Makiinadaha Ceelasha Biyaha  
Stationery engine equipment operators.

8.26. MAKIINADAHA SOO SAARIDDA SHIXMADDA

MATERIAL HANDLING EQUIPMENT OPERATORS.

151. Ku shaqaynta Makiinadaha Roggidda iyo Raridda  
Dockers and freight handlers
152. Hagaajinta keebalada iyo ku shaqaynta Makiinadaha  
wax jiida.  
Riggers and cable splicers
153. Makiinadaha Carro guridda  
Earth-moving and related Machinery Operators
154. Ku shaqaynta Wiishashka iyo Kaneenada  
Crane and hoist operators

8.27. GAADIIDKA

TRANSPORT EQUIPMENT OPERATORS

155. Hagaajinta Makiinadaha Maraakiibta  
Ships, deck ratings, barge crews and boatmen
156. Hagaajinta iyo Wadidda Tareenka  
Railway engine Drivers
157. Wadidda Baabuurta  
Motor Vehicle Drivers
158. Hagaajinta Makiinadaha Baabuurta  
Transport Equipment Operators

8.28. HAWL

SERVICE WORKERS.

159. Cunto Kariye  
Cooks
160. Safaynta Dharka iyo Kaawiyadaynta  
Dry cleaners and pressers
161. Timo Hagaajiye iyo Xiire  
Hair Dressers and Barbers.
162. Dab-damiye